



**DAWLAD GOBOLEEDKA PL
EE SOOMAALIYA**

**PUNTLAND STATE
OF SOMALIA**

Maamulka G/Mudug

Mudug R/Administration

Guddoonka Waxbarashada Gobolka Mudug

Ref: REO/ /2005

Gaalkacyo, 20th February 2005

→ Ku: *609/GWGM/2005* Guddoomiyaha Gobolka Mudug Gaalkacyo
 Ku: Taliyaha Qaybta Booliiska Gobolka Mudug Gaalkacyo
 Ku: Taliyaha Ciidanka Daraawiishta Gobolka Mudug Gaalkacyo
 Ku: Duqa Magaalada Gaalkacyo Gaalkacyo
 Og: Agaasimaha Guud Was. Waxbarashada Garoowe
 Og: Wasiirka Waxbarashada Garoowe

Uj: Hanti ummadeed oo si sharci darro loola Wareegay

Tixraac warqadda summadeedu tahay MD/HD/CIC/15/05, kana soo baxday Maamulka Dugsiga hoose dhexe Cabdullaahi Ibnu Cabbaas, kuna saabsanayd la wareegid Dugsiga hoose dhexe Cabdullaahi Ibnu Cabbaas.

Haddaba, waxaan ku wargelinayaa mas'uuliyiinta warqaddani ay sida tooska ah iyo ogeysiintaba ugu socoto, in baryahaan ay soo baxayeen Kooxo Burcad ah oo dano gaar ah leh, kuwaaso si sharci darro ah ula wareegay Dugsiyadii umadda ka dhexeeyey, kooxahaas oo dano gaar ah leh, ujeedadooduna ay tahay:-

- Inay Manhajkii Soomaaliga ahaa ku baddelaaan Manhaj carabi ah
- Inay Dugsiyada umadda ka dhaxaysa u isticmaalaan hab-ganacsi .
- Inay Abuuraan Arday caqiido khaldan rumaysan.
- Inay Carqalad ku abuuraan maamulka gobolka, gaar ahaan maamulka waxbarashada.

Sidaas awgeed, waxaa laga codsanayaa mas'uuliyiinta gobolka Mudug, inay ka hortagaan waxyeelada ka imaan karta arimahaas.

Talo soo jeedin:

Waxaan soo jeedineynaa:

- In Dugsiyada ay sida burcadnimada ah ay ula wareegeen kooxaha xag jirka ah lagu soo celiyo gacanta wasaaradda waxbarashada ee gobolka
- In shaqsiyaadka arintaan ka dambeeya laga qaado talaabo sharciga waafaqsan
- In laga joojiyo dhismaha dugsiyada cusub ee gobolka laga dhisayo, maadaama aaney wasaaradda ka haysan wax ogolaansho ah.

- In dugsiyada aan hoos imaan GWGM in viro;

Waxaan mar labaad ka codsaneynaa max uuliyiinta gobolka, inay si xeel dheer u eegaan dagaalka kooxaha Al-Itixaad ku hayaan maamulka Gobolka Mudug, gaar ahaan waxbarashada.

Guul Eebbe iyo Wax ka qabasho deg-deg ah

C/raxmaan Cali Warsame
Guddoomiyaha Waxbarashada Gobolka Mudug

